Somaliska

Ny i Sverige (textversion av filmen nyanland.arbetsformedlingen.se)

Filimka ku saabsan dadyoowga dalka Iswiidan ku cusub

Ku saabsan filimka

Waa salaaman tahay kuna soo-dhowoow hogaaminta aan ugu talogalnay dadyoowga dhowaan la siiyay ruqsadda degenaanshada (sharciga) ee dalka Iswiidan, oona xaq ku leh waxkaqabadiyada gaarka ee ku salaysan sal-dhigida dalka.

Markii aad doonto ayaa filimka hakin kartaa adigoo riixa botonka hakinta [pausknappen]. Sidaasoo kale haddii aad doonayso inaad kala xulato cutubyda waxaad ka beddeli kartaa hoos. Halka luqada laga beddelo wuxuu ku yaala kor dhinaca midigta. Haddii aad doonayso inaad bedelka filimka aqrisato warbixinta riix halka ay ku qoran tahay [text].

Dalka Iswiidan waxaa ka hirgalay sharci u suurtagelinaayo dadyoowga dalka Iswiidan ku cusub badidooda xaq u yeelanshada waxkaqabasho ku salaysan taageero. Ujeedada laga lee yahay ayaaa waxay tahay in dadyoowga dalka ku cusub ay dhaqsi shaqo u helaan. La xiriir Xafiiska Shaqada haddii u shaki kaga jiro in arrintaan ay ku khuseeyso ama in kale.

Filimku wuxuu ka sheekaynayaa waxkaqabadyada adiga ku khuseyn kara, iyo talaabooyinka laf ahaantaada qaadi karto sidii aad shaqo dhaqsi ku heli lahayd awgeed.

Waxaan kaloo ka warbixin doonaa nidaamyada adiga ku khuseeya ee ku saabsan hoyga, kaalmo-dhaqaaleedka iyo sida aad Xafiiska Shaqada u la xiriiri karto. Waxaan kaloo ku siin doonaa naseexooyin sida aad warbixin ugu heeli karto goobo kale.

Ku saabsan Xafiiska Shaqada

Xafiiska Shaqada [Arbetsförmedlingen] waa hey'ad dowladeed isla markana ah halka Dalka Iswiidan ugu wayn ee lagala xiriiri arrimaha shaqada. Xilka Xafiiska Shaqada waxaa weeyaan in hab firfircon oo suuragal ah isku keeno shaqo dooneyaasha iyo shirkadaha shaqaalaha u baahan. Xafiiska Shaqada wuxuu ka hawlgala dalka oo idil, adeegyadiisa oo idil waa lacag la'aan.

Shaqo raadsasho awgeed qof kasta ayaa booqan karaa Xafiiska Shaqada. Teeda kale, qofka dhowaan sharciga dalka Iswiidan la siiyay wuxuu mudo laba sano ah xaq ku leeyahay waxkaqabadiyada ku salaysan taageero oo isaga u gaar ah. Ujeedada waxay tahay in qofku u sida ugu dhaqsida badan u helo shaqo iyo isku filnaansho dhaqaaleed.

Shabakadda internetka Xafiiska Shaqada waxaad ka raadsan kartaa kumanyaal boosas shaqo oo bannaan iyo warbixin dhaqdhaqaaqa kale oo aad ka faa'iidaysan karto. Waxaa kalo talo iyo taageero ka heli kartaa gacanhaaye Xafiiska Shaqada adiga ku khuseeya.

Hoyga

Kaddib markii ruqsadda degenaanshada ee dalka Iswiidan lagu siiyo ee aad go'aansato inaad dalka ku noolato, waxaad u baahan tahay inaad hesho hoygii aad ku noolan lahayd. Taasi mas'uuliyadeeda adiga ay ku saaran tahay inaad hesho, laakinse waxaa jiri karto fursad u Xafiiska Shaqada arrintaas ka caawinno.

Sidaas awgeed, saamayn kuma yeelan kartid halka Xafiiska Shaqada u hoy kaaga heli karo, laakin waxaad xaq ku leedahay inaad diido. Xaaladaas fursad labaad laguma siin doono – waa inaad iskaaga hoy u raadsataa oona u hesha.

Diiwangelinta dadwaynaha

Waxaa muhim ah inaad iska diiwan geliso diiwanka guud ee dadwaynaha oo lagu siiyo tobbanka lambar ee aqoonsiga ee [personnummer] loo yaqaanno. Kuwaasoo ku fududayno doono lacagaha aad xaqa ku leedahay markii aad dhaqdhaqaaqa ka qeybgalayso. Tobbanka lambar ee aqoonsiga waxaad kaloo u baahan tahay goorta aad hey'ad-dowladeed la xiriirayso ama aad doonayso inaad xisaab bangiga ka furato. Hey'adda [Skatteverket] ayaa mas'uul ka ah diiwangelinta dadwaynaha.

Kaalmo-dhaqaaleedka

Haddii aad ka qeybgasho dhaqdhaqaaqa ku salaysan Qorsheha sal-dhigida ee adiga ku gaarka ah, waxaa lagu siin karaa kaalmo-dhaqaaleedka ee Gunnada sal-dhigida [etableringsersättning] loo yaqaanno. Ha iloowin in lacagtaas loogu talagalay inaad ku iibsato raashin, dhar iyo kharashka hoyga. Teeda kale, waa inaad isaga bixisaa

gaadiidka baska, tareenka iwm. Sida socdaallada u sabab ha waraysiga shaqo ku qorida iyo dhaqdhaqaaqa sal-dhigida.

Waxaa suuragal noqon karto helida lacag dheeraad ah oo xiriir la leh Gunnada sal-dhigida, waa haddii aad carruur leedahay ama kharash hoy ku gaar ah. Waxyaalahaan iyo warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa gacanhaaye Xafiiska Shaqada adiga ku khuseeya.

Qorsheha sal-dhigida

Xafiiska Shaqada iyo adiga waxaad ka wada arrinsan doontaan sida u xafiisku ku caawini karo, iyo sida adiga laf ahaantaada aad ku dadaali lahayd oo aad dhaqsi shaqo u heli lahayd. Wadahadalka noocaas waxaa loo yaqaanna wadahadalka sal-dhigida [Etableringssamtal] waxaan wadajir u diyaari doonaa Qorsheha sal-dhigida [etableringsplan] adiga ku gaar ah. Qorsheha sal-dhigida wuxuu ka kooban yahay dhaqdhaqaaqa ujeedadiisa ah in lagu fududeeyo sidii dhaqsi aad shaqo ku heli lahayd.

Tusaale ahaan waxay noqon kartaa barashada luqada iswiidishka ee soo-gaaleetiga loogu talagalay (sfi) – oo ku suuragelin doonto inaad ku hadasho af-iswiidishka. Markaas kaddib haddii weligaa aad dhamaystirin dhigashada Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ama dugsi sare waxaad dhigan kartaa dugsiga dadka waawayn loogu talagalay, Komvux.

Ama waxaa lagu siin karaa tababar. Waxaa lagugu tababari karaa goob shaqo oo aad ku baran karto xirfad, xiriir yeelato ama aad ka waayoarag qaadato goobaha shaqada dalka Iswiidan ama hab-shaqaynta laamaha ganacsiga Dalka Iswiidan.

Waxaad kaloo heli kartaa fursad lagu qimeeyo waxbarashadaada iyo karti-xirfadeedyadaada. Waxaa lagu siin karaa warbixinta waxtarka ay suuqa shaqada dalka Iswiidan ka leeyihiin. Ka feker inaad arursato oona keydsato caddaymaha, shahadooyinka iyo qoraallada ee muhimka ah oo aad ku caddayn karto waxbarashadaada iyo khibradahaaga.

Dowladda hoose e degmada aad degan tahay waxay ku siin doontaa fursad aad ugu qeybgasho koorso jihaynta bulshada, taasoo ku suuragelin doonto helida aqoonta hab-shaqaynta bulshada dalka Iswiidan.

Ka feker in adiga aad mas'uul ka tahay dhaqan-gelinta dhaqdhaqaaqa ku xusan qorsheha lagu qorsheeyay. Xafiiska Shaqada wuxuu ka caawini karaa dhinaca taageerada, xilliga qorsheha dhowr jeer ayaa horumarinta

qorsheha awgiis wada kulmi doona, lagula qabsiin doono wadada aad shaqo ku heli lahayd.

Qodobka ugu muhimsan waxaa weeyee inaad wakhti buuxa 40 saacadood toddobaadkii ka qeybgasho dhaqdhaqaaqa. Haddii aysan ku suuragalayn inaad wakhti buuxa qorsheha ka qeybgasho waxaa loola qabsiin kara hadba xaaladaada. Haseyeeshe, waxaa muhim in ah inaad Xafiiska Shaqada wargeliso oo aan ku wada heshiinno isbedelkaas. Haddii aadan sidaasi yeelin waxaa dhici karto in aan lagu siin wax lacag ah.

Haddii itaaldarro awgeed ay karti-shaqaysashadaada hooseeyso, waxaa lagu siin karaa fursad baxnaanis, taasoo ku suuragelin doonto inaad ku filnaato noolol-maalmeedkaaga iyo suuqa shaqada.

Haddii aadan aqoon af-iswiidishka waxaan ku qaban karnaa turjubaan. Teeda kale, waxaan ka caawini karnaa in aan ku turjunno caddaymo, shahaadooyin iyo qoraallada kale ee muhimka ah.

Markii lagu diyaariyo Qorsheha sal-dhigida adiga ku gaarka ah waxaa hab-dhiska kombyuutarkeenna ka diiwan gelin doonaa warbixin-shaqsiyeedkaaga. Waa warbixin ku salaysan xajinta sirta xirfada, taasoo macneheeda ah in qof aan shaqo ku lahayn u aqrisan karo warbixin-shaqsiyeedka.

Wadada shaqada

Haddii weli aadan shaqo helin, waxaa muhim ah in aad hab joogto oo firfircoon shaqo u raadsato. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad xal u hesho xaalad-dhaqaaleedkaaga iyo isku filnaansho-dhaqaaleedkaaga. Xafiiska Shaqada wuxuu ka caawini karaa oo keliyaa talosiinta shaqo raadsashada. Waxaad korarsan kartaa aqoon dheeraad oo xiriir la leh, warbixin ugu muhimsan ee uu loo shaqeeyeha doonaayo in u helo goorta waraysiga shaqo ku qorida lagula yeelanaayo. Waxaad kaloo ka qeybgeli kartaa koorso lagu barto sida loo diyaariyo cv-ga wanaagsan. Xafiiska Shaqada wuxuu ku siin karaa naseexooyin ku saabsan cv:ga iyo sida laysku diyaariyo waraysiga shaqo ku qorida kahor.

Shabakadda internetka ee Xafiiska Shaqada waxaad ka raadsan kartaa shaqooyinka boosas ka bannaan ee aad codsan karto, warbixin ku saabsan xirfadaha kala duwan iyo sida aayahooda dame ay noqon doonto. Isla shabakadda internetka waxaad ka heli kartaa warbixin ku saabsan arrimo kale oo muhim ah oo fiican inaad ka fekerto goorta aad xirfad xulanayso, ama waxbarashada kala duwan iyo sida aad u maalgelin karto waxbarashadaada. Isla goobtaas waxaad ka heli kartaa

Isku-xireha bogagga kale warbixin dheeraad ku saabsan xirfadaha iyo waxbarashadaha.

Xafiiska Shaqada waxaa laga hela fursad looga qeybgalo aqoon-korsasho/seeminar iyo dhaqdhaqaaq ku saabsan shaqo iyo waxbarasho.

Kaddib markii aad Xafiiska Shaqada iska diiwan geliso waxaad bilaabi doontaa Qorsheha sal-dhigida. Markii loo shaqeeyeha u na wargeliyo boos shaqo bannaan waxaan isku jaanqaadaynaa shuruuda loo shaqeeyeha iyo shaqaalaha u doonaayo ee xafiiska ka diiwan gashan. Haddii karti-xirafadeedkaaga iyo shaqaalaha loo shaqeeyeha u doonaayo is waafaqsan yihiin, waxaan ku wargelin doonaa booska shaqada bannaan ee aad codsan karto.

Laakinse ka feker in Xafiiska Shaqada ka sokkoow ay jiraan goobo kale ee aad shaqo ka raadsan karto. Teeda kale, toos ayaa loo shaqeeyeha ula xiriiri kartaa. Maaxaayeelay, boosaska shaqoooyinka bannaan badidooda lama shaaciyo. Loo shaqeeyeha toos ayuu shaqaalaha u qorta.

Haddii aad iska diiwan geliso shirkadaha shaqaalaha laga kireysto [bemanningsföretag] waxaad ka heli kartaa shaqooyin kala duwan oo mudo gaaban ama dheer.

Waxaa kaloo wanaagsan inaad saaxibadaada, goobaha berri hore ka shaqayn jirtay iwm aad wargeliso inaad shaqo doon tahay oo ay arrintaas ka caawiyaan. Waxaa dhici karto in ay ka warqabaan goob shaqaale adigoo kale looga baahan yahay.

Tirada ku garanayso oo ka warqabto karti-xirfadeedkaaga, oona haysto cv:gaaga waxay sare u qaadaysa fursada aad shaqo ku heli lahayd.

Farintii oo kooban: waxaad mas'uul ka tahay in sida ugu dhaqsida badan aad hesho fursadii aad ku shaqaysan lahayd oo ku heli lahayd isku filnaansho dhaqaaleed.

Xiriid

Siyaabaha hoos ku xusan ayaa Xafiiska Shaqada ula xiriiri kartaa:

- Adigoo booqda laamaha Xafiiska Shaqada (isniin-jimce maalinimmo)
- Shabakadda internetka Xafiiska Shaqada www.arbetsformedlingen.se
- Khadka taleefanka 0771-416 416 ama lambarrada hoos ku qoran:

Somaliska

Ny i Sverige (textversion av filmen
nyanland.arbetsformedlingen.se)

Haddii loo baahdo waxaa Xafiiska Shaqada ka hawlgala turjubaanno kala turjimi karo afkaaga hooyo iyo af-iswiidish.

Ku soo-dhowoow dalka Iswiidan, waa adiga iyo shaqo-raadinta nasiib leh!